OGOOW: Nuqulkq elektarooniga ah ee dukumiintigaan ayaa ah nuqulkii ugu danbeeyay ahna nuqulka keliya ee la aqbalaayo. Haddii aad haysato nuqul waraaq ah, waa masuuliyad ku saaran inaad xaqiijiso inuu yahay nuqul lamid ah nuqulka elektarooniga ah. Nuqulka daabacan ayaa lo arkaa inuu yahay dukumiinti aan la xakamayn karin.

SWEDISH

## CAAWIMAAD DHAQAALE – CHARITY CARE

| | | |
|---|---|---|
| **Mawduuca: Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha (Charity Care) ee Sweden** | Lambarka Xeerka: PSJH RCM 002 - SHS | |
| **Waaxda**<br>Maamulka Mareegta Dakhli aruurinta | ☐ Cusub<br>☒ Wax laga badelay<br>☐ Dib loo eegay | **Taariikhda**:<br>2/16/2023 |
| **Maalgeliyaha Fulinta:**<br>Madaxa Mareegta Dakhli aruurinta ee SVP | **Mulkiilaha Xeerka:**<br>Agaasimaha Fulinta ee Talo Bixinta Dhaqaalaha | |
| **Waxaa ansixiyay:**<br>Madaxa Mareegta Dakhli aruurinta ee SVP | **Taariikhda Dhaqan gelinta:** 4/1/2023 | |

Swedish Health Services iyo Swedish Edmonds ("SHS" ama "Swedish") waa urur caafimaad oo khayri ah oo ku shaqeeya higsigiisa ah kor u qaadista caafimaadka iyo faya qabka qof kasta oo aan ub adeegno, asagoo raacaaya Mabaadii'diisa Aasaasiga ah oo ah badqabka, daryeel muhiimada saaraaya bukaanka, qadarin, daryeel iyo naxariis, wada shaqayn iyo iskaashi, waxbarasho joogto ah iyo hormarin iyo hogaamin, iyo fikirka ah in daryeelka caafimaadku yahay xuquuq aadane. Waa falsafada iyo dhaqanka isbitaal kasta oo ay leedahay SHS in daryeelka caafimaadka degdega ah iyo kan caafimaad ahaan muhiimka ah ay isla markaba helayaan xubnaha bulshooyinka aan u adeegno, ayadoo aan laga eegayn awoodooda dhiibista qarashka.

**BAAXADA:**

Xeerkaan ayaa qabanaaya dhammaan isbitaallada SHS ee ku yaala gobalka Washington, iyo dhammaan adeegyada xaalada degdega ah, kuwo dhakhsada ah iyo adeegyada kale ee caafimaad ahaan Muhiimka ah ee ay bixiyaan isbitaallada SHS (marka laga reebo daryeelka tijaabada ah, baaritaanka ah, ama ikhtiyaariga ah). Liiska iyo sharaxaada dheeriga ah ee isbitaallada SHS iyo xarumaha la xiriira ee xeerkaani daboolaayo ayaa laga heli karaa Bandhiga A ee Liiska Xarumaha Xeerku qabanaayo. Marka aan adeegsano erayga "isbitaal" gudaha xeerkaan, waxaan ula jeednaa dhammaan xarumaha lagu qeexay Bandhiga A.

Xeerkaan waxaa loo turjumayaa qaab waafaqsan Qaybta 501(r) ee Xeerka Dakhliga Gudaha oo soo baxay 1986, nuqulkiisa ugu danbeeyay, iyo Cutubka 70.170.060 ee Xeerka Wax laga Badelay ee Washington, nuqulkiisa ugu danbeeyay. Marka ay iska horyimaadaan qodobada sharciyadaas iyo xeerkaan, sharciyadaas ayaa saxan.

**UJEEDADADA:**

Ujeedada xeerkaan waa in la xaqiijiyo siinta caawimaad dhaqaale (charity care) cadaalad ah, aan lahayn takoor, waxtar badan, oo midaysan shaqsiyaadka u qalma ee aan awoodin inay baxshaan lacagta oo dhan


© 2023 Swedish Health Services

ama qayb kamid ah qarashka xaalada degdega ah ee caafimaad ahaan muhiimka ah iyo adeegyada kale ee isbitaalka oo ay baxshaan isbitaallada SHS.

Xeerkaan waxaa loogu talagalay inuu raaco dhammaan sharciyada federaalka, gobalka, iyo kuwa maxaliga ah. Xeerkaan iyo barnaamijyada caawimaada Dhaqaalaha ee ku jira halkaan ayaa matalaaya Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha (FAP) ee rasmiga ah iyo Xeerka Daryeelka Caafimaadka Degdega ah ee isbitaal kasta oo ay leedahay, kireysatay ama maamusho SHS.

**SHAQSIYAADKA MASUULKA KA AH:**

Waaxaha Mareegta Dakhli uruurinta. Waxaa intaas dheer, dhammaan shaqaalaha ku haboon ee fulinaaya shaqooyinka la xiriira diiwaan gelinta dadka isbitaalka la dhigo, talo bixinta dhaqaalaha, iyo taageerada macaamiisha ayaa heli doona tababar joogto ah oo xeerkaan la xiriirta.

**XEERKA:**
SHS ayaa siin doonta adeegyada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee isbitaalka bukaannada u qalma ee danyarta ah, aan lahayn caymiska iyo kuwa aan haysan caymiska ku filan kuwaasoo ku jira heerka ama ka hooseeya 400% ee FPL iyo bukaannada aan haysan caymiska ku filan marka awoodooda bixinta qarashka adeegyada ay caqabad ku tahay helitaanka xaalada degdega ah ee caafimaad ahaan muhiimka ah iyo daryeelka kale ee isbitaalka aysana helayn meel kale oo ay ka helayaan qarashka. Bukaannadu waa inay buuxshaan shuruudaha u qalmida ee lagu cadeeyay xeerkaan si ay ugu qalmaan.

Isbitaallada SHS ee leh waaxaha gaarka u ah xaaladaha degdega ah ayaa bixinaaya, bilaa takoor, daryeelka xaaladaha degdega ah ee caafimaadka (oo waafaqsan qeexitaanka Sharciga Daawaynta Caafimaadka Daawaynta caafimaadka Degdega ah iyo Shaqada iyo Cutubka 246-453-010 ee Xeerka Maamulka ee Washington) taasoo waafaqsan awoodaha la heli karo, ayadoo aan laga eegayn in qofku u qalmo caawimaad dhaqaale iyo in kale. SHS ayaan cidna u takoorayn sabab la xiriirta da', isir, midab, caqiido, qoomiyad, diin, wadanka uu kasoo jeedo, xaalada guurka, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga ama fahanka jinsiga, naafada, aqoonsiga hawlgabka ciidanka ama milatariga, iyo sabab kasta oo kale oo uu mamnuucaayo sharciga federaalka, gobalka, ama maxaliga ah marka la gaaraayo go'aannada caawimaada dhaqaalaha.

Isbitaallada SHS ee leh waaxaha gaarka u ah xaaladaha degdega ah ayaa bixinaaya baaritaannada xaaladaha caafimaadka ee degdega ah iyo daawayn xaalad dejin ah ama u gudbinaaya oo u wareejinaaya qofka meel kale haddii wareejinta noocaas ah ay ku haboon tahay sida ku cad 42 C.F.R. 482.55 iyo RCW § 70.170.060. SHS waxay mamnuucaysaa falal kasta, farsamooyinka dhigista, ama xeerarka ka hor istaagaaya shaqsiyaadka inay dalbadaan daryeel caafimaad oo degdeg ah, sida ogolaanshaha talaabooyinka soo uruurinta daynta oo carqalad ku noqonaaya bixinta daryeelka caafimaadka degdega ah.

**<u>Liiska Xirfadleyaasha uu qabanaayo SHS FAP:</u>**


© 2023 Swedish Health Services

Isbitaal kasta oo ay SHS leedahay wuxuu si gaar ah u aqoonsanayaa liiska dhakhaatiirta, kooxaha caafimaadka, ama xirfadleyaasha kale ee bixinaaya adeegyada ee ku jira iyo kuwa aan ku jirin xeerkaan. Isbitaal kasta oo ay SHS leedahay ayaa siinaaya liiskaan bukaan kasta oo nuqulkiisa codsada. Liiska dhakhaatiirta ayaa sidoo kale laga helayaa oonlaynka barta SHS: www.swedish.org/obp.

**Shuruudaha U qalmida Caawimaada Dhaqaalaha:**
Caawimaada dhaqaalaha waxaa heli kara labadaba bukaannada caymiska leh iyo kuwa aan caymiska lahayn iyo dadka damiinka ka ah marka caawimaada noocaas ah ay waafaqsan tahay xeerkaan iyo sharciyada federaalka iyo gobalka ee maamulaaya dheefaha loo ogol yahay bukaannada. Isbitaallada SHS ayaa samayn doona dedaallada ku haboon si ay u go'aanshaan jiritaanka ama jiritaan la'aanta qolo sadexaad oo bixisa qarashka oo la heli karo, dhiibtana dhammaan ama qayb kamid ahq arashka, ama xaalada damaanada ee charity care, si loo baxsho daryeelka ay bixiyeen isbitaallada SHS, kahor intaan la codsan dedallada uruurinta daynta ee ka dhanka ah bukaanka.

Marka bukaan ama wakiilkiisa uu u qalmi karo caawimaad lagu baxsho barnaamijyada caawimaada caafimaadka ee cutubka 74.09 RCW ama isdhaafsiga gunnada caafimaadka ee Washington, ama la go'aansho inuu u qalmo caawimaad daryeelka caafimaadka oo xili hore kasoo bilaabanaysa oo lagu baxsho barnaamijyada caawimaada caafimaadka ee cutubka 74.09 RCW, isbitaalka SHS ayaa siinaaya caawimaad bukaanka ama wakiilka si uu u codsado caawimaadaas. Caawimaada dhaqaalaha ayaa la diidi karaa haddii bukaanka ama wakiilkiisu ku fashilmo inuu sameeyo dedaallada macquulka ah si uu ula sahqeeyo uuna uga caawiyo isbitaallada SHS codsashada caawimaadaas. Isbitaallada SHS ayaan culays qayru macquul ah saari doonin bukaanka ama wakiilka inta lagu jiro hawsha codsiga caawimaada dhaqaalaha iyo caymiska xili hore kasoo biloowday, ayadoo la tixgelinaayo ciladaha jirka, maskaxda, garaadka, ama dareemaha, ama caqabadaha luuqada kuwaasoo carqalad ku noqon kara awooda dhinaca masuuliyada leh ee ku dhaqanka habraacyada codsiga. Bukaannada ay iska cadahay ama qayb ahaan aan u qalmin ama loo aqoonsaday inaysan u qalmin 12 bilood ee lasoo dhaafay gudahood barnaamij gobal ama federaal ayaan laga doonayn inay codsadaan barnaamijyadaan si ay u helaan caawimaad dhaqaale.

Bukaannada aan caymiska haysan ayaa heli kara qiimo dhimista dadka aan caymiska lahayn kahor intaan loo xaqiijin u qalmida caawimaada dhaqaalaha. Baaqyada u qalma caawimaada dhaqaalaha waxaa kamid ah laakiin kuma koobna kuwa soo socda: Bukaannada aan haysan caymiska iyo kuwa ayagu qarashka iska dhiibaaya, qarashaadka bukaannada caymiska leh oo ka helaaya daboolid qorshe SHS aysan qayb ka ahayn, qaybta caymiska, lacagta caymisku jarto, iyo qaybta qarashka ee la xiriira bukaannada caymiska leh. Cadadka caymisku jaranaayo iyo tan qaybta caymiska oo lagu dalbaday inay tahay daynta xun ee Medicare ayaa laga saari doonaa wargelinta daryeelka deeqda ah.

Bukaannada doonaaya caawimaada dhaqaalaha waa inay buuxshaan Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha u qalmida ayaana lagu saleyn doonaa baahida dhaqaalaha laga bilaabo taariikhda adeegga ama laga bilaabo taariikhda codsiga, hadba kii muujinaaya cadadka hooseeya ee dakhliga iyo baahida ugu wayn ee dhaqaalaha. Bukaannada ayaa codsan kara caawimaad haddii xaaladooda dhaqaaluhu isbadesho, xataa haddii codsigii hore la diiday ama la ogolaaday qayb kamid ah. Dedaallada u haboon ayaa la qaadi doonaa si loogu sheego looguna wargeliyo bukaannadda helitaanka caawimaad dhaqaale ayadoo la


© 2023 Swedish Health Services 

siinaayo xog inta lagu jiro isbitaal dhigistooda iyo marka isbitaalka laga saaraayo, ama wargelinnada qoraalka ah ee la xiriira biilka ama lacag uruurinta, aagaga adeegyada biilka ama dhaqaalaha ee bukaanku geli karaan, webseedka isbitaalka SHS, ayadoo afka looga sheegaayo inta lagu jiro wada hadalka lacag bixinta, iyo sidoo kale boorka ku dhagan aagaga bukaan jiifka iyo bukaan socodka, ayna ku jiraan aagag bukaanka la geeyo ama laga diiwaan gasho iyo waaxda xaalada degdega ah. Turjumaanno ayaa la lagu bixin doonaa luuqad kasta oo ay ku hadlaan wax ka badan toban boqolkiiba dadka ku nool aaga isbitaalka. SHS ayaa hayn doonta xogta loo adeegsaday ho'aaminta u qalmida si waafaqsan farsamooyinkeeda diiwaan haynta

**Codsashada Caawimaada Dhaqaalaha:** Bukaannada ama wakiillada ayaa codsan kara oo diri kara Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, kaasoo lacag la'aan ah lagana heli karo xarunta SHS ama qaababka soo socda: shaqaalaha talo bixinta adeegyada dhaqaalaha bukaanka marka la gaaro ama kahor waqtiga isbitaala laga baxaayo caawimaada ayaa la codsadaa lana soo gudbiyaa dukumiintiga la buuxshay; lagu diro boostada, ama in la booqdo www.swedish.org/obp, ayadoo lasoo dejinaayo lana diraayo codsiga la buuxshay oo wata dukumiintiga. Qof codsanaaya caawimaad dhaqaale ayaa la siin doonaa baaritaanka hordhaca ah, kaasoo ay ku jirayaan dib u eegista in bukaanku waaway ama uusan u qalmin adeegyada lacag bixinta qolo sadexaad iyo inuu u qalmi karo shuruudaha charity care.

Isbitaal kasta oo kamid ah SHS ayaa u diyaarin doona shaqaale qaas u ah inay ka caawiyaan bukaannada buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha iyo go'aaminta u qalmida caawimaada dhaqaalaha ee SHS ama caawimaada dhaqaalaha ee barnaamijyada caymiska dawladu maal geliso, haddii ay jiraan. Adeegyada turjumaada ayaa la heli karaa si looga jawaabo su'aalo kasta ama walaacyada iyo si looga caawiyo buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha.

Bukaan ama wakiil u qalmi kara codsashada caawimaad dhaqaale ayaa u keeni kara dukumiintiga ku filan SHS si ay u taageeraan go'aaminta u qalmida mar kasta oo ay ogaadaan in dakhligoodu ka hooseeyo heerka ugu hooseeya ee Heerka Fakhriga Federaaliga (FPL) sida ku cad xeerarka quseeya ee Federaalka iyo Gobalka. SHS ayaa joojin doonta dhammaan hawlaha dayn uruurinta inta ay socoto go'aaminta u qalmida caawimaad dhaqaale, marka la xaqiijiyo in bukaanka ama wakiilku uu la shaqaynaayo dedaallada SHS ee macquulka ah ee gaarista go'aamin hore.

SHS waxay qiraysaa in go'aanka u qalmida caawimaada dhaqaalaha ama qiimo dhimista la gaari karo xili kasta marka la ogaado in dakhliga bukaanku uu ka hooseeyo 400% heerka fakhriga ee federaalka ayadoo laga eegaayo tirada qoyska. Waxaa intaas dheer, SHS ayaa dooran karta inay caawimaad dhaqaale bixiso ayadoo keliya ku saleyanaysa go'aanka hore ee xaalada bukaanka oo ah qof danyar ah. Marka ay sidaan dhacdo, dukumiintiga ayaan loo baahnayn.

**Xaaladaha Gaarka ah ee Dhaqaalaha:** Dakhliga, hantida qaar, iyo qarashaadka bukaanka ayaa loo adeegsan doonaa qiimaynta xaalada dhaqaalaha bukaanka gaarka ah. SHS ayaa ka fiirsan doonta uruurina doonta xog ku saabsan hantida sida uu amraayo Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ee warbixinta qarashka Medicare. Hantida la tixgelinaayo marka go'aan la gaaraayo u qalmida caawimaada dhaqaalaha laguma daraayo: (A) halka qof, $100,000 koobaad ee hantida lacageed ee bukaanka, iyo 50% hantida lacageed ee bukaanka oo ka badan $100,000; (B) qoyska ka kooban labo qof


© 2023 Swedish Health Services 

OGOOW: Nuqulkq elektarooniga ah ee dukumiintigaan ayaa ah nuqulkii ugu danbeeyay ahna nuqulka keliya ee la aqbalaayo. Haddii aad haysato nuqul waraaq ah, waa masuuliyad ku saaran inaad xaqiijiso inuu yahay nuqul lamid ah nuqulka elektarooniga ah. Nuqulka daabacan ayaa lo arkaa inuu yahay dukumiinti aan la xakamayn karin.

SWEDISH

ama ka badan, $100,000 koobaad ee hantida lacageed ee qoyska, iyo 50% hantida lacageed ee qoyska oo ka badan $100,000 ee koobaad; (C) maalgashi kasta oo qofka ugu jirta guriga uu dagan yahay; (D) lacagta hawlgabka ama qorsheyaasha magdhawga dib loo dhigay ee ku cad Xeerka Dakhliga Gudaha ama ama qorsheyaasha aan u qalmin ee dib loo dhigay; (E) hal gaari matoor ku shaqeeya iyo gaariga labaad ee matoorka ku shaqeeya haddii ay muhiim u tahay shaqada ama ujeedooyin caafimaad; (F) dhulka heshiis kasta oo aaska marxuumka oo horey lacagtiisa loo baxshay; iyo (G) xeer kasta oo caymiska nolosha ah oo leh qiimo u dhigma $10,000 ama kayar. Qiimaha hanti kasta oo leh ganaaxa la bixida xili hore waa inay noqotaa qiimaha hantida kadib marka ganaaxa la baxsho. Codsiyada xogta ee ka yimaada SHS ayna u dirto dhinaca ay qusayso si loo xaqiijiyo hantida ayaa ku koobnaan doonta mida sida macquulka ah muhiimka u ah lana heli karo si loo go'aansho jiritaanka, helitaanka, iyo qiimaha hantida qofka loomana adeegsan doono in lagu hor istaago codsashada daryeelka bilaashka ah ama qiimaha jaban. Foomamka labo jibaarka ah ee xaqiijinta ayaan la codsan doonin. Keliya cadaynta hal koonto markaas furan ayaa loo baahan doonaa si loo xaqiijiyo hantida lacageed. Hadii aan la heli karin wax dukumiinti ah, SHS ayaa ku tiirsanaan doonta bayaanka qoran ee saxiixan ee kasoo baxa qofka codsiga diraaya. Xog kasta oo hantiyeed oo uu helay isbitaalku intuu waday qiimaynta u qalmida bukaanka ee charity care ayaan loo adeegsan doonin uruurinta daynta hantidana looma tixgelin doono qoysaska ku jra heer ka hooseeya 300% heerka fakhriga ee federaalka.

**U qalmida Dakhliga ku Saleysan:**
Shuruudaha dakhliga, ee lagu saleeyay FPL, ayaa loo adeegsan doonaa in la go'aansho u qalmida daryeel bilaash ah ama qiimo jaban. Fadlan ka eeg Bandhiga B wixii faahfaahin ah.

**Go'aaminta iyo Ansixinta:**
Bukaannada ayaa heli doona ogeysiiska go'aaminta u qalmida FAP 14 maalmood kadib marka ay soo gudbiyaan Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha iyo dukumiintiyada muhiimka ah. Go'aan kasta oo u qalmid ah waxaa ku jiri doona sharaxaada sababaha loo cuskaday diidmada. Marka codsiga la helo, dedaallada dayn uruurinta ayaa la hakin doonaa ilaa go'aan qoraal ah lagasoo saaraayo u qalmida loona diro bukaanka. Isbitaalku ma gaaraayo go'aanka u qalmida caawimaada asagoo raacaaya xogta isbitaalku aaminsan yahay inaysan sax ahayn ama la isku halayn karin.

**Xalinta Khilaafka:**
Bukaanka ayaa racfaan ka qaadan kara go'aanka u qalmida caawimaada dhaqaalaha asagoo u keenaaya cadeyno dheeri ah isbitaalka 30 maalmood gudahood marka la helo ogeysiiska diidmada. Bukaanka ayaa u baahan kara inuu cadaymo dheeri ah keeno si uu u taageero racfaankiisa. SHS ayaa joojin doonta shaqada uruurinta daynta inta ay wado dib u eegista racfaanka. Dhammaan racfaannada waa la eegi doonaa haddii dib u eegistu xaqiijisana diidmada, ogeysiis qoraal ah ayaa loo diri doonaa wakiilka iyo Waaxda Caafimaadka Gobalka, marka loo baahdo, iyo sida ku cad sharciga. Hanaanka kama danbaysta ah ee racfaanka ayaa lasoo afjari doonaa 10 maalmood gudahood marka la helo diidmada isbitaalka ka timaada. Racfaan ayaa loo diri karaa Swedish Medical Center, Attn: Corporate Business Office, 747 Broadway, Seattle, WA 98122.

**Deeqda Hormariska ah:**


© 2023 Swedish Health Services

OGOOW: Nuqulkq elektarooniga ah ee dukumiintigaan ayaa ah nuqulkii ugu danbeeyay ahna nuqulka keliya ee la aqbalaayo. Haddii aad haysato nuqul waraaq ah, waa masuuliyad ku saaran inaad xaqiijiso inuu yahay nuqul lamid ah nuqulka elektarooniga ah. Nuqulka daabacan ayaa lo arkaa inuu yahay dukumiinti aan la xakamayn karin.

SWEDISH

SHS ayaa u ogolaan karta bukaanka deeq ayadoo ka eegaysa baaqiga koontada ayadoo eegaysa qaabab aan ahayn Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ee uuxa. Go'aannada noocaas ah ayaa lagu gaari doonaa bilaa codsi ayadoo la adeegsanaayo farsamada qiimaynta dhaqaalaha ee isbitaalka aqoonsan yahay taasoo qiimaynaysa awooda bixinta qarashka oo lagu saleeyay diiwaannada la heli karo ee dadwaynaha ee dhaqaalaha iyo diiwaannada kale,

**Xaaladaha Kale ee Gaarka ah:**

Bukaannada u qalma barnaamijyada FPL u qalma sida Medicaid iyo barnaamijyada kale ee dawladu bixinayso ee caawimaada danyarta ah, ayaa sidoo kale u qalmi kara caawimaad dhaqaale. Baaqiyada koontada bukaanka ee ka dhasha qarashaadka an kuwa aysan soo magi karin Medicaid ama barnaamijyada kale ee dawladu maalgeliso ee caawimaada danyarta ayaa u qalmi kara qarash dhaafka deeqda ah ee buuxa ama qaybta ah, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna qarashaadka aan caymisku soo magi karin ee adeegyada caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la xiriira waxyaabaha soo socda:

- Joogitaannada bukaan jiifka la diiday
- Maalmaha daryeelka bukaan jiifka la diiday
- Adeegyada aan caymisku daboolin
- Diidmooyinka Hore ee Ogolaanshaha Daawaynta
- Diidmooyinka ka dhashay caymiska cayiman

**Qarashaadka Caafimaadka ee Qayru Macquulka ah:**
SHS, marka ay sidaas xal u aragto, ayaa deeq siin karta qofka marka qarashka caafimaadku xad dhaaf noqdo. Bukaanadaan waxaa lagu maarayn doonaa qof iyo xaaladiis.

**Xiliyada Xaalada Degdega ah:**
Caawimaada Dhaqaalaha ayaa lagu heli karaa marka ay sidaas doonto SHS xiliyada ay jiraan xaaladaha degdega ah ee qaranka ama gobalka, caawimaada madaxa banaan ee qarashaadka xad dhaafka ah.

**Xadidaada Qarashaadka Dhammaan Bukaannada U qalma Caawimaada Dhaqaalaha:**
Ma jiro bukaan u qalma midkood qaybaha kor lagu xusay ee caawimaada oo si gaar ah masuul uga noqonaaya wax ka badan boqoleeyda "Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka" (AGB) oo ah qarashaadka guud, sida lagu qeexay hoos.

**Qorshayaasha Qarash Bixinta Macquulka ah:**
Marka bukaanka loo ogolaado caawimaad dhaqaale oo qayb ah, laakiin wali baaqi lagu leeyahay, SHS ayaa kala hadlaysa qorshaha bixinta qarashka. Qorshaha lacag bixinta macquulka ah ayaa ka koobnaan doona lacagaha bilaha ah (oo aan lahayn dulsaar ama lacagta ganaaxa dib u dhaca) kuwaas oo aan ka badnayn 10 boqolkiiba (dakhliga bishii ee bukaanka ama qoyska, marka laga reebo lacagaha loo jarto Qarashaadka Aasaasiga ah ee Nolosha kuwaasoo bukaanku ku qoray Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha.

**Biilka iyo Uruurinta Daynta:**

OGOOW: Nuqulkq elektarooniga ah ee dukumiintigaan ayaa ah nuqulkii ugu danbeeyay ahna nuqulka keliya ee la aqbalaayo. Haddii aad haysato nuqul waraaq ah, waa masuuliyad ku saaran inaad xaqiijiso inuu yahay nuqul lamid ah nuqulka elektarooniga ah. Nuqulka daabacan ayaa lo arkaa inuu yahay dukumiinti aan la xakamayn karin.

SWEDISH

Baaqiyo kasta oo aan la bixin oo lagu leeyahay bukaannada ama wakiillada kadib marka la siiyo qiimo dhimisyada la heli karo, haddii ay jiraan, ayaa loo gudbin karaa dayn uruurin. Dedaallada dayn uruurinta ee baaqiyada aan la bixin ayaa la joojin doonaa inta lagasoo saaraayo go'aanka u qalmida FAP. SHS ma samaynayso, ogolaanayso, ama uma ogolaanayso wakaalada dayn uruurinta inay fuliyaan talaabooyinka qayru caadiga ah ee dayn uruurinta. Si aad u hesho xog ku saabsan xeerarka biilka iyo dayn uruurinta ee SHS ee koontooyinka bukaannada, fadlan akhri xeerka Isbitaalka SHS, kaasoo aad bilaash uga helayso miiska diiwana gelinta ee isbitaal kasta oo ay SHS leedahay, ama barta: www.swedish.org/obp.

**Lacag Celinta Bukaanka:**
Marka bukaan ama wakiil oo lacag kku baxsho adeegyada kadibna gadaal laga ogaado inuu u qalmo daryeelka bilaashka ah ama qiimaha jaban, lacag kasta oo la baxsho oo la xiriirta adeegyadaas intii lagu jiray mudada uu u qalmo FAP taasoo ka badan masuuliyada lacageed ee laga rabay ayaa la celin doonaa, si waafaqsan sharciyada gobalka.

**Dib u eegista Sannadlaha ah:**
Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee SHS (Charity Care) ayaa dib u eegis lagu samayn doonaa sanad kasta waxaana dib u eegista samayn doona hogaamiyaha Mareegta Dakhliga ee shaqada leh.

**Waxyaabaha ka reeban:**

Arag xadiga kore.

---

**Qeexitaanno**

Ujeedooyinka xeerkaan awgiis qeexitaannada soo socda iyo shuruudaha ayaa qabanaaya:

1. Heerka Fakhriga Federaaliga (FPL): FPL ayaa ka dhigan tilmaamaha fakhriga oo si joogto ah loogu cusbooneysiiyo Diiwaanka Federaalka ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha ee Maraykanka.

2. Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB): Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ee qarashaadka xaalada degdega ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan Muhiimka u ah bukaannada le caymiska ayaa loo yaqaanaa xeerkaan dhexdiisa AGB. SHS ayaa go'aamisa u qalmida boqolkiiba cadadka AGB ayadoo ku dhufanaysa qarashaadka guud ee isbitaalka ee xaalad kasta oo degdeg ah ama caafimaad ahaan muhiim ah boqoleeyda cayiman taasoo lagu saleeyay sheegashada lagu ogolaaday Medicae iyo bixiyaasha ganacsiga. Waraaqaha xogta oo faahfaahinaaya boqoleeyda AGB, iyo sida loo xisaabsho, ayaa laga heli karaa marka la booqdo webseedka soo socda: www.swedish.org ama inaad wacdo **1-866-747-2455** si aad u codsato nuqul:

3. Talaabada Qayru Caadiga ah ee Uruurinta Daynta (ECA): ECA waxaa lagu qeexaa


© 2023 Swedish Health Services

talaabooyinka u baahan hanaanka sharciga ama garsoorka, oo ay ku jirto in daynta laga iibsho dhinac kale ama xogta sumcad dilka ah oo loo diro wakaaladaha ama laamaha daynta. Talaabooyinka u baahan hanaanka sharciga ama garsoorka ee ujeedadaan waxaa kamid ah: la wareegida guriga qofka; qabsashada ama la wareegida koontada baanka ama hantida kale ee shaqsiga ah; soo gudbinta dacwad madani ah oo ka dhan ah qofka; talaabooyinka keenaaya in qofka lasoo xiro; talaabooyinka keenaaya in qofka la jajuubo; iyo lacagta laga jarto mushaarka.

## Shuruudaha Sharciga

| |
|---|
| *Xeerka Dakhliga Gudaha Qaybta 501(r); 26 C.F.R. 1.501(r)(1) – 1.501(r)(7)* |
| *Xeerka Maamulka ee Washington (WAC) Cutubka 246-453* |
| *Xeerka Cusub ee Washington (RCW) Cutubka 70.170.060* |
| *Sharciga Daawaynta Caafimaadka ee Xaalada Degdega ah iyo Shaqada (EMTALA), 42 U.S.C. 1395dd* |
| *42 C.F.R. 482.55 iyo 413.89* |

## Tixraacyada

ReferencesInst

| |
|---|
| *Tilmaamaha Deeqda Ururka Isbitaallada Maraykanka* |
| *Tilmaamaha Balanqaadka Providence St. Joseph ee Caafimaadka Dadka aan Caymiska Lahayn* |
| *Buug Tusmeedka Qarash Celinta Dhakhtarka Qaybta I, Cutubka 3, Farqada 312* |


© 2023 Swedish Health Services

OGOOW: Nuqulkq elektarooniga ah ee dukumiintigaan ayaa ah nuqulkii ugu danbeeyay ahna nuqulka keliya ee la aqbalaayo. Haddii aad haysato nuqul waraaq ah, waa masuuliyad ku saaran inaad xaqiijiso inuu yahay nuqul lamid ah nuqulka elektarooniga ah. Nuqulka daabacan ayaa lo arkaa inuu yahay dukumiinti aan la xakamayn karin.

SWEDISH

**Jaantuska A**
**Liiska Xarumaha Xeerku Qabanaayo**

| **Isbitaallada SHS ee ku yaala Washington** | |
|---|---|
| Swedish Medical Center First Hill/Ballard | Swedish Medical Center Cherry Hill |
| Swedish Issaquah | Swedish Edmonds |

Si loo cadeeyo, xeerkaan ayaa sidoo kale qabanaaya dhammaan waaxaha bukaan jiifka iyo bukaan socodka xarunta iyo rugaha caafimaadka. Waxaa intaas dheer, xeerkaan ayaa qabanaaya shaqaalaha xarumaha xeerku quseeyo, iyo sidoo kale wakaalad kasta oo khayri ah ama wakaalad khayri ah oo ay inteeda badan maamusho ama leedahay Swedish sitana magaca ururka Swedish iyo shaqaalahooda.


© 2023 Swedish Health Services

OGOOW: Nuqulkq elektarooniga ah ee dukumiintigaan ayaa ah nuqulkii ugu danbeeyay ahna nuqulka keliya ee la aqbalaayo. Haddii aad haysato nuqul waraaq ah, waa masuuliyad ku saaran inaad xaqiijiso inuu yahay nuqul lamid ah nuqulka elektarooniga ah. Nuqulka daabacan ayaa lo arkaa inuu yahay dukumiinti aan la xakamayn karin.

SWEDISH

**Jaantuska B**
**Shuruudaha Dakhliga ee Isbitaallada SHS**

| **Haddii...** | **Kadib ...** |
|---|---|
| Dakhliga qoyska ee sanadkii, oo lagu dabaqay tirada qoyska, uu yahay ama ka hooseeyo 300% heerarka hadda ee FPL, | Bukaanka la go'aansho inuu dhaqaale ahaan faqiir yahay uuna u qalmo caawimaad dhaqaale oo 100% looga cafinaayo qarashka bukaanka laga rabo. |
| Dakhliga qoyska ee sanadkii, oo lagu dabaqay tirada qoyska, uu yahay inta u dhexaysa 301% iyo 400% heerarka hadda ee FPL, | Bukaanka ayaa u qalma qiimo dhimis dhan 75% oo laga dhaafaayo qarashaadka guud ee lagu leeyahay bukaanka. |
| Haddii dakhliga sanadkii ee qoyska, oo lagu dabaqay tirada qoyska, uu ku egyahay ama ka hooseeyo 400% FPL bukaankuna leeyahay caymiska qarashaadka guud ee caafimaadka ee uga baxay isbitaallada SHS 12 kii bilood ee lasoo dhaafay kaasoo ka badan 20% dakhliga sanadkii ee qoyskiisa, ayadoo lagu dabaqaayo tirada qoyska, adeegyada waafaqsan xeerkaan, | Bukaanka ayaa u qalma deeqda 100% ee gunnada oo lagu daboolaayo qarashka bukaanka lagu leeyahay. |


© 2023 Swedish Health Services